



## Macluumaadka Baadhitaanka Aragga:

Waad ku mahadsan tahay inaad u ogolaatay ilmahaaga ama carruurtaada inay ka qaybqaataan barnaamijka baaritaanka araga ee 5M Lions KidSight ee Degmooyinka Badan.

Baadhitaankani **ma uu** beddelayo baadhista aragga ee dhammaystiran oo uu sameeyo khabiirka daryeelka indhaha. Inta lagu jiro baaritaanka waxaan eegnaa xanuunada soo socda:

**Hal il oo cawiran:** Taas macneheedu waxa weeye in labada indhood ay leeyihiin awood qalooqa eegitaan oo kala duwan, sidaas darteed waxaa jira diirad saarid aan sinnayn oo u dhaxaysa labada indhood. Tani waxay noqon kartaa tilmaame Araga oo la ciifa ama "Aragga oo ka Yaraada Hal II"

**Astigmatism-ka:** waa qalad qalooqa eegitaanka ah oo uu sababay qalooqa xagasha isha iyo/ama muraayada.

**Si fiican u arkida waxa fog:** Si fiican u arkida waxa fog, oo ay ku adkaato aragtida waxa dhow.

**Si fiican u arkida wax dhow:** Si fiican u arkida waxa dhow, oo ay ku adkaato aragtida waxa fog.

**Cabirka isha oo aan booskiisi fadhin:** Isku dheelitir la'aanta muruqa ee suurtoogalka ah ama isha aan booskeeda fadhin oo sidoo kale loo yaqaan strabismus-a. Xaaladdan waxay sidoo kale noqon kartaa tilmaame Araga oo la ciifa ama "Aragga oo ka Yaraada Hal II"

**Cabirka bu'da isha oo aan isla ekeyn:** Waxa loola jeedaa bu'yada oo laba kala cabir noqda isku mar. Jiritaanka bu'da oo aan isla ekeyn waxay noqon kartaa mid caadi ah, ama waxay noqon kartaa calaamad muujinaysa xaalad caafimaad oo gudaha jirta.

**Kaliya** baaritaanka aragga oo dhameystiran oo uu sameeyo khabiirka daryeelka indhaha ayaa go'aamin kara haddii ilmahaagu qabo xanuunada lagu aqoonsaday habka baaritaanka.

Waxaan kugu dhiirgelinaynaa inaad ballan la yeelatid xirfadlaha daryeelka indhaha sida ugu dhakhsaha badan haddii ilmahaagu qabo mid ama in ka badan oo xaaladahan ah oo ku qoran foomka natiijada baaritaanka.

Haddii baadhista ubadkaagu aanay keenin gudbin, waxaanu kugu dhiirgelinaynaa in si joogto ah loo baaro aragga ilmahaaga.

Naadiga Lions Club ee deegaankaaga.